



# Istaraatiijiyadda Ootisimka Da'a Kasta ee Camden

## Qorshaha Hirgelinta

Camden

# Mawduuca 1: Macluumaad iyo talo

**Dadka deegaanka ah ee qaba Autism-ka iyo waalidiintooda iyo daryeelayaashooda inay helaan macluumaadka ay u baahan yihiin, marka ay u baahdaan.**

| Waxa aan ballan qaadayno inaan qabanno muddada 5-ta sano ah ee istaraatiijiyaddan (ballanqaadyada istaraatiijiyadda). Waxaan: | Ficillada 12-ka bilood ee ugu horreeya (Sebtembar 2025 iyo wixii ka dambeeya) |
|---|---|
| **Si Wanaagsan u Bilaabidda**<br>1. U fududaynta qoysaska iyo dhalinyarada Ootisimka qaba inay helaan macluumaad waxtar leh.<br>2. Ka caawinta dhammaan carruurta iyo dhallinyarada inay fahmaan cudurka ootisimka iyo kor u qaadista sinnaanta iyo dabeecadaha togan ee kala duwanaanshaha.<br>3. Bixinta macluumaad cad oo hufan oo ku saabsan adeegyada u diyaarka ah carruurta ootisimka qaba (oo ay ku jiraan kuwa aan si rasmi ah loo ogaan inay qabaan ootisimka) iyo qoysaskooda, iyo halka u-qalmitaanka uu ku kala duwan yahay, iyadoo la dejinayo shuruudaha.<br>4. Abuurista iyo horumarinta fursadaha bulshada iyo shabakadaha ka sokow adeegyada caafimaadka iyo daryeelka bulshada ee qoysaska ootisimka la tacaalaya.<br><br>**Si Wanaagsan u Noolaanshaha iyo U Gaboobida**<br>5. Ka caawinta dadka waaweyn inay joogteeyaan helitaanka shabakadaha iyo taageerooyinka laga soo bilaabo xilliga carruurnimada ilaa qaangaarnimada, iyo inay helaan macluumaad cad oo la heli karo oo ku saabsan taageerada dheeraadka ah ee la heli karo marxaladaha kala duwan ee nolosha.<br>6. U fududeynta dhammaan dadka waaweyn ee qaba autism-ka, waalidiinta iyo daryeelayaasha ee ku sugan Camden inay weydiistaan caawimaad, iyo xaqiijinta inay hufnaan ka jirto waxa la bixinayo iyo taageerada la heli karo, oo ay ku jiraan xuquuqahooda iyo waxyaabaha ay xaqa u leeyihiin.<br>7. Ka dhigista macluumaadka mid laga heli karo dhammaan meelaha ay dadka waaweyni sheegaan inay muhiim u yihiin, tusaale ahaan caawimaad hore, joogtaynta caafimaadka togan ee maskaxda, helitaanka shaqo iyo taageero dhaqaale ama hoy.<br>8. Ku taageerida dadka waaweyn ee qaba autism-ka inay helaan taageero si ay u daboolaan baahiyahooda iyo rabitaanadooda; in laga dhigo inay ogaadaan xuquuqahooda qiimeynta Xeerka Daryeelka iyo wax-ka-bedelada macquulka ah. | **Da'a Kasta**<br>• Horumarinta iyo meeldheer gaarsiinta websaydyadeena.<br>• Xaqiijinta inay jirto macluumaad ku saabsan taageerada ay dadka deegaanka ah ee qaba autism-ka ku heli karaan goobaha bulshada (maktabadyada, Xarumaha Qoyska iyo iskuulada).<br>• Dib u eegista fahamka iyo taageerada ay heli karaan dadka deegaanka ah ee qaba autism-ka ee la xiriira Contact Camden (Kooxda Adeegga Macaamiisha Taleefanka ee Camden) si ay u raadsadaan una helaan talo iyo macluumaad.<br><br>**Si Wanaagsan u Bilaabidda**<br>• Hage u samaynta qoysaska, asxaabta iyo daryeelayaasha carruurta iyo dhalinyarada qaba autism-ka si ay u ogaadaan meesha ay ka heli karaan taageero.<br>• Samaynta barnaamij waxbarasho cilmi-nafsiyeed oo loogu talagalay waalidiinta iyo daryeelayaasha kooxaha jira da'da dugsiyada hoose iyo sare.<br><br>**Si Wanaagsan u Noolaanshaha iyo U Gaboobida**<br>• Wadaagista macluumaad isleh oo ku saabsan Daryeelka Bulshada Dadka Waaweyn iyo taageerooyinka loogu talagalay dadka waaweyn ee qaba autism-ka iyo daryeelayaashooda, macluumaadkaas oo lala wadaagayo adeeg-bixiyeyaasha loo xilsaaray, adeegyada NHS iyo adeegyada mutadawacnimada iyo kuwa bulshada ee maxalliga ah.<br>• La shaqaynta shaqaalaha/asxaabta waaxda Isgaarsiinta si loo xaqiijiyo in sawirrada dhismayaasha muhiimka ah halkaas oo shaqaalaha Daryeelka Bulshada Dadka Waaweyn ay kula kulmaan dadka deegaanka ah ay yihiin kuwo laga heli karo khadka tooska ah, iyo sidoo kale macluumaadka ku saabsan goobaha, si dadka waaweyn ee qaba autism-ka ay u ogaadaan waxa ay filan karaan marka ay booqdaan goobahaas. |

## Mawduuca 2: Caafimaadka, badqabka iyo madaxbannaanida

**Dadka Autism-ka qaba inay ku noolaadaan nolosha ay rabaan, iyagoo qaba badbaado iyo badqab.**

| Waxa aan ballan qaadayno inaan qabanno muddada 5-ta sano ah ee istaraatiijiyaddan (ballanqaadyada istaraatiijiyadda). Waxaan: | Ficillada 12-ka bilood ee ugu horreeya (Sebtembar 2025 iyo wixii ka dambeeya) |
|---|---|
| **Si Wanaagsan u Bilaabidda**<br>9. La shaqaynta hawlgalayaasheena NHS si loo caddeeyo adeegyada caafimaadka ee loo heli karo carruurta iyo dhalinyarada qaba autism-ka, loo yareeyo waqtiyada sugitaanka, loona bixiyo macluumaad caawimaad ah haddii aan la helin ogaanshaha cudurka.<br>10. Wanaajinta macluumaadka iyo talooyinka ku habboon da'da ee ku saabsan joogtaynta caafimaadka togan ee maskaxda iyo jirka ee carruurta iyo dhalinyarada qaba autism-ka.<br>11. Qaadista hab sinnaan ku dheexan ee adeegyada carruurta, iyadoo la aqoonsanayo in carruurta iyo dhalinyarada qaba autism-ka lakin aan qabin naafanimada waxbarashada ay la kulmaan caqabado dheeraad ah oo ku aadan ka qaybqaadashada adeegyada iyo dhacdooyinka guud.<br>12. Hagaajinta taageerada aan siino dugsiyada si loo daboolo baahiyaha ardayda qabta autism-ka.<br><br>**Si Wanaagsan u Noolaanshaha iyo U Gaboobida**<br>13. Ka wada shaqaynta si wax looga qabto sinnaan la'aanta ka jirta helitaanka adeegyada caafimaadka, daryeelka bulshada iyo adeegyada bulshada ee ballaaran.<br>14. Ka dhigista adeegyada caafimaadka, daryeelka bulshada iyo adeegyada bulshada ee ballaaran kuwo xog-ogaal u ah autism-ka, joogto ah oo la isku halleyn karo.<br>15. Wax ka qabashada waxyaabaha sababa liidashada caafimaadka jirka iyo maskaxda iyo caqabadaha ay dadka kala kulmaan helitaanka caawimaad hore.<br>16. Ka wada shaqaynta sidii kor loogu qaadi lahaa badqabka iyo madaxbannaanida adeegyada caafimaadka iyo daryeelka bulshada.<br>17. Xaqiijinta in dalabyadeena guryeynta ay yihiin kuwo ay heli karaan/ isticmaali karaan dadka waaweyn ee qaba autism-ka iyo in adeegyadeena taageerada guryaha ay ku habboon yihiin baahiyahooda shaqsiyeed, oo ay ku jiraan baahiyaha dareenka.<br>18. In si firfircoon loola socodsiiyo dadka waaweyn ee qaba autism-ka sida loo helo daryeel iyo taageero loogu talagalay da'dooda iyo heerka noloshooda. | **Da'a Kasta**<br>• La shaqaynta hawlgalayaasheena caafimaadka iyo shabakadaha ballaaran si aan u bilowno horumarinta hab isku-dhafan oo lagu uruurinayo laguna falanqeynayo xogta ku saabsan autism-ka.<br>• Kala shaqaynta asxaabteena/shaqaalaha xarumaha madadaalada iyo jardiinooyinka sidii loo abuuri lahaa meelo ku habboon dadka qaba autism-ka oo si buuxda loo isticmaali karo si dadka ay ugu samaystaan hawlaha jimicsiga iyo madadaalada.<br>• In indho fahmi kara autism-ka lagu eego hawlaha ka dhacaya Hiigsiga Camden ee ah inay noqoto Degmo Saaxiibtinimo leh.<br><br>**Si Wanaagsan u Bilaabidda**<br>• Sii wadista horumarinta barnaamijyada caalamiga ah iyo Xarumaha Qoysaska ee loogu talagalay qoysaska sugaya qiimeynta ogaanshaha cilladaas caafimaad.<br>• Xaqiijinta hadba intii suurtagal ah in xogta ugu yar ee sinnaanta adeegyada Carruurta iyo Dhalinyarada (CYP) la uruuriyo lana falanqeeyo si loo xaqiijiyo inaan si fiican u fahanno faraqa ka jira xagga isticmaalka iyadoo laga eegayo sinnaanta.<br>• Taageerida ardayda qaba autism-ka qaba si ay u guulgaaraan iyadoo dib u eegis lagu samaynayo lana horumarinayo taageerada wacyigelinta iyo la-talinta ee ay heli karaan dugsiyada, iyo iyadoo la samaynayo Qalabka Daboolida Baahiyaha La Saadaali Karo 12ka bilood ee soo socda si macluumaad iyo talooyin wax ku ool ah loogu bixiyo goobaha caadiga ah.<br><br>**Si Wanaagsan u Noolaanshaha iyo U Gaboobida**<br>• Horumarinta iskaashiyo diiradda saaraya autism-ka oo lala yeelanayo ururada muhiimka ah, sida NHS iyo adeegyada loo xilsaaray, si dib loogu eego loona horumariyo dariiqyada gudbinta iyo barashada dhaqamada xog-ogaalka u ah autism-ka.<br>• Falanqaynta xogta soo ifbaxaysa iyadoo laga eegayo dhanka sinnaanta iyo isku-jirka si loo bilaabo horumarinta faham dhammaystiran oo joogto ah oo ku saabsan baahiyaha dadka waaweyn ee qaba autism-ka ee ku sugan Camden. |

## Mawduuca 3: Bulshooyin firfircoon oo taageero leh

**Dadka deegaanka ah ee qaba Autism-ka, qoysaskooda iyo daryeelayaashooda inay joogtayn karaan xiriirada ay la leeyihiin bulshada weliba qaab macno u leh iyaga.**

| Waxa aan ballan qaadayno inaan qabanno muddada 5-ta sano ah ee istaraatiijiyaddan (ballanqaadyada istaraatiijiyadda). Waxaan: | Ficillada 12-ka bilood ee ugu horreeya (Sebtembar 2025 iyo wixii ka dambeeya) |
|---|---|
| **Si Wanaagsan u Bilaabidda**<br>19. Samaynta meel, hawlo iyo adeegyo oo loo dhan yahay looguna talagalay carruurta iyo dhalinyarada qaba autism-ka.<br>20. Horumarinta barnaamijyadeena taageerada ee loogu talagalay qoysaska, asxaabta iyo daryeelayaasha carruurta iyo dhalinyarada qaba autism-ka.<br>21. Aqoonsashada iyo abuuritaanka fursado loogu talagalay dhalinyarada qaba autism-ka si ay u mutadawac uga noqdaan, u shaqeeyaan oo ay u wadaagaan dano guud.<br><br>**Si Wanaagsan u Noolaanshaha iyo U Gaboobida**<br>22. Xaqiijinta in dadka waaweyn ee qaba autism-ka ay heli karaan taageerooyinka dadka isku faca ah, hawlaha loo dhan yahay iyo shabakadaha bulshada.<br>23. Taageerida dadka waaweyn ee qaba autism-ka si ay u helaan uga qaybqaataan shaqada, tababarka, waxbarashada iyo mutadawacnimada dookhooda ah.<br>24. Xaqiijinta in daryeelka bulshada, guryaha, cadaaladda dambiyada iyo adeegyada caafimaadka ee Camden ay yihiin kuwo xog-ogaal u ah autism-ka.<br>25. U oggolaanshaha dadka waaweyn ee qaba autism-ka iyo qoysaskooda, asxaabtooda iyo daryeelayaashooda inay helaan taageero-bixiyeyaal iyo adeegyo ballaaran oo autism-ka tixgelinaya.<br>26. Daboolida baahiyaha dadka waayeelka ah ee qaba autism-ka ee ku jira adeegyada guryaha, cadaaladda dambiyada, daryeelka bulshada iyo adeegyada caafimaadka ee Camden iyadoo la aqoonsanayo in dadkaas intooda badan aysan mari doonin hannaanka cillad ogaanshaha. | **Da'a Kasta**<br>• Xaqiijinta in dhismayaasheena ay yihiin kuwo autism-ka tixgeliya – oo ay ku jiraan Maktabadaheena, Xarumaha Qoysaska iyo Xarumaha Dhalinyarada.<br>• Abuurista hage ku saabsan baahiyaha dareenka ee dhismayaasha Golaha, iyo hage ku saabsan qoraallada diyaargarowga ee shaqaalaha golaha.<br>• Bixinta xirmooyinka dareenka ee Maktabadaheena iyo Xarumaha Qoysaska.<br><br>**Si Wanaagsan u Bilaabidda**<br>• Bixinta fursado shaqo barasho oo mutadawacnimo ah iyo kuwo mushahaar leh oo loogu talagalay dadka qaba autism-ka ee dhammaan hawgalayaasha iyada oo loo marayo Hawlgalka Dhalinyarada ee Camden.<br>• La wadaagista waxbarashadeenna iyo tababarkeenna ee hawlgalayaasha Camden si aan uga wada shaqeyno goobaha iyo hawlaha loo dhan yahay.<br><br>**Si Wanaagsan u Noolaanshaha iyo U Gaboobida**<br>• Sii wadista deeqda loogu talagalay Xarunta Autism-ka iyo Wax-ka-qabashada Naafanimada Camden – si loo siiyo awood ay kor qaadaan codadka iyo waayo-aragnimada dadka naafada ah iyo kuwa autism-ka qaba iyo si loo bixiyo taageerooyinka dadka isku aasaaga ah.<br>• Maalgelinta Xarunteena Shaqada Naafanimada iyo tababarada shaqo ee la taageero oo loogu talagalay dadka deegaanka ah ee autism-ka qaba. |

## Mawduuca 4: Daryeel iyo taageero dabacsan oo isku dhafan

**Dadka deegaanka ah ee qaba Autism-ka, qoysaskooda iyo daryeelayaashooda inay helaan taageero dabacsan, si iyaga gaar u ah.**

| Waxa aan ballan qaadayno inaan qabanno muddada 5-ta sano ah ee istaraatiijiyaddan (ballanqaadyada istaraatiijiyadda). Waxaan: | Ficillada 12-ka bilood ee ugu horreeya (Sebtembar 2025 iyo wixii ka dambeeya) |
|---|---|
| **Si Wanaagsan u Bilaabidda**<br>27. Samaynta barnaamij cad oo taageero ah oo lagu daboolayo baahiyo kala duwan oo ay wadaagaan carruurta iyo dhallinyarada qaba autism-ka, oo ay ku jiraan kuwa sugaya qiimeynta, is-aqoonsiga iyo ka dib ogaanshaha cillada.<br>28. La shaqaynta hawlgalayaasha waxbarashada, caafimaadka, daryeelka bulshada iyo adeegyada guud si loo bixiyo taageero isku dubaridan iyo tixgelinta danaha ballaaran iyo yoolalka shaqsiyeed ee ilmaha marka la qorsheynayo taageerada.<br>29. Samaynta adeegyo caalami ah oo la heli karo oo leh aqoon wanaagsan oo ku saabsan barnaamijyada ballaaran ee laga heli karo ee ka baxsan kuwooda, kuwaas oo awood u leh inay dadka u jiheeyaan taageerooyinka takhasuska leh ee dheeraadka ah hadba meeshii loo baahdo.<br>30. Sare u qaadista xirfadda shaqaalaha adeegyada carruurta si ay u aqoonsadaan baahiyaha carruurta iyo dhallinyarada qaba autism-ka si loo xaqiijiyo in qorshayaashooda ay ka tarjumayaan taageerada ay u baahan yihiin.<br><br>**Si Wanaagsan u Noolaanshaha iyo U Gaboobida**<br>31. Bixinta daryeel iyo taageero isku dhafan oo loogu talagalay dadka waaweyn ee qaba autism-ka taas oo u sahlaysa inay ku noolaadaan oo ay u gaboobaan sida ay rabaan, taas oo sidoo kale aqoonsanaysa awooddooda iyo baahiyahooda shaqsiyeed.<br>32. Xaqiijinta in adeegyada ay yihiin kuwo la heli karo iyo inay yihiin kuwo aqoon wanaagsan u leh barnaamijyada ballaaran ee laga heli karo ee ka baxsan kuwooda, kuwaas oo awood u leh inay dadka u jiheeyaan taageerooyinka takhasuska leh ee dheeraadka ah hadba meeshii loo baahdo.<br>33. Kor u qaadista wada shaqaynta ka dhaxaysa dadka waaweyn ee qaba autism-ka, adeegyada daryeelka bulshada, caafimaadka, guryaha iyo adeegyada kale ee bulshada si loo hirgeliyo hababka Team Around Me ee xog-ogaalka u ah cilladaha autism-ka iyo dhaawacyada noolaleed. | **Da'a Kasta**<br>• La shaqaynta adeegyada caafimaadka si wax badan looga barto baahiyaha dadka qaba autism-ka ee ku jira Dynamic Support Register (Diiwaanka Dadka Naafada ah), kuwaas oo halis ugu jira ama la dhigay isbitaalka dhimirka si loo horumariyo waxqabashada carruurnimada loona aqoonsado baahiyaha aan la daboolin.<br><br>**Si Wanaagsan u Bilaabidda**<br>• Dib u eegis ku samaynta helitaanka naadiyada dhalinyarada ee tayada sare leh, barnaamijyada iyo hawlaha loogu talagalay carruurta qaba autism-ka.<br>• Dib u eegis ku samaynta nusqaanka ka jira barnaamijyada taageerada ah ee loogu talagalay U-diyaargarowga Qaangaarnimada ee carruurta iyo dhalinyarada qaba autism-ka kuwaas oo aan qabin naafanimada waxbarashada.<br><br>**Si Wanaagsan u Noolaanshaha iyo U Gaboobida**<br>• Sii kaabida iskaashiyada ka jira adeegyada Daryeelka Bulshada ee Dadka Waaweyn iyo adeegyada loo xilsaaray, si loo helo shaqo mashruuc oo diiradda lagu saarayo autism-ka, shirarka kooxda qoysaska, Team Around Me, iskaashiyada daroogada iyo khamriga iyo cadaaladda dambiyada, iyo sahaminta hababka MDT. |

## Mawduuca 5: Marka wax loo baahan yahay in wax laga beddelo

**Dadka deegaanka ah ee qaba Autism-ka inay heli karaan taageero firfircoon, wakhti hore ah oo fudud, iyo inay xakameyn karaan xaaladaha inta lagu jiro xilliyada kala-guurka, si looga hortago sii xumaanshaha dhibaatooyinka.**

| Waxa aan ballan qaadayno inaan qabanno muddada 5-ta sano ah ee istaraatiijiyaddan (ballanqaadyada istaraatiijiyadda). Waxaan: | Ficillada 12-ka bilood ee ugu horreeya (Sebtembar 2025 iyo wixii ka dambeeya) |
|---|---|
| **Si Wanaagsan u Bilaabidda**<br>34. Wax ka barashada khibradaha carruurta, dhallinyarada qaba autism-ka iyo qoysaskooda si loo dhiso fahamka adeegyada ee ku aadan marxaladaha nolosha ilmaha qaba autism-ka halkaas oo taageero dheeraad ah loogu baahan karo lana aqoonsan karo kheyraad/agabyo lagu taageerayo dhexmeerida waqtiyadan.<br>35. Falanqaynta waxqabadyadeena xasaradaha si loo fahmo waxa shaqeynaya iyo waxa aan shaqaynayn iyo si loo aqoonsado dhaqamada wanaagsan, nusqaanka/faraqa iyo iska kaashiga abuurista xalalka ka hortagga ah.<br>36. Taageerida dhallinyarada qaba autism-ka si ay u samaystaan madaxbannaani iyo xirfadaha nolosha iyo abuurista meelo badbaado leh oo ay ugu dhaqmaan xirfadahaas.<br>**Si Wanaagsan u Noolaanshaha iyo U Gaboobida**<br>37. Horumarinta diyaargarow cad oo loogu talagalay qorshaha qaangaarnimada laga bilaabo adeegyada carruurta ilaa adeegyada dadka waaweyn ee loogu talagalay dhallinyarada qaba autism-ka. Tani waxaa ku jiri doona macluumaad iyo talooyin cad oo hufan iyo, hadba intii suurtagal ah, qorsheynta hordhaca ah iyo u diyaargarowga isbeddellada.<br>38. Hagaajinta helitaanka u-doodista sharciyeed iyo kuwa aan sharciga ahayn ee xog-ogaalka u ah autism-ka, gaar ahaan xilliyada isbeddelka iyo kala-guurka.<br>39. Xaqiijinta in dadka autism-ka qaba ay heli doonaan taageero joogto ah oo la isku halleyn karo kuwaas oo lagu joogteeyay adeegyada kala duwan (tusaale ahaan, kooxaha caafimaadka dhimirka iyo daryeelka bulshada).<br>40. Marka dadka waaweyn ee qaba autism-ka ay la kulmaan caqabado, kala-guur, ama xasarado, dhiirigelinta wada-shaqayn u dhaxaysa dadka waaweyn ee qaba autism-ka, adeegyada daryeelka bulshada, caafimaadka, guryaha iyo adeegyada kale ee bulshada si loo hirgeliyo hababka Team Around Me ee xog-ogaalka u ah cilladaha autism-ka iyo dhaawacyada noolaleed.<br>41. Ahmiyad siinta xuquuqaha, rabitaanada iyo danaha ugu wanaagsan ee dadka qaba autism-ka inta lagu jiro qaan-gaarnimada iyo da'da waynaanta, gaar ahaan inta lagu jiro isbeddellada waaweyn, sida u baahnaanshaha in loo guuro guri cusub ama u baahnaanshaha daryeel iyo taageero ku aadan autism-ka si loo ilaaliyo madaxbannaanidooda. | **Si Wanaagsan u Bilaabidda**<br>• Horumarinta taageerada ay bixiyaan hay'adaha isku dhafan oo loogu talagalay dhalinyarada qaba autism-ka ee u gudbaya qaan-gaarnimada iyada oo loo marayo Golaha Ilaalinta Badqabka Kala-guurka ee hay'adaha isku dhafan ee Camden.<br>• Bixinta macluumaad iyo taageero hore oo loogu talagalay carruurta ku jira kala-guurka marxaladaha waxbarashada, oo ay ka mid tahay in kal-fadhiyo macluumaad-bixineed loo qabto waalidiinta iyo daryeelayaasha sannad ka hor aysan dhicin u wareegida iyo ka bixitaanka dugsiyada hoose iyo sare iyo dhammaystirka dib u eegisyada sannadlaha ah ee EHCP-yada marka la gaaro dhammaadka teeramka dayrta ka hor kala-guurka.<br>• Ku lifaaqida waxyaabaha laga bartay Dib-u-eegisyada Daaweynta Waxbarashada Daryeelka (CETR) si looga hortago sii socoshada dhibaatooyinka.<br>**Si Wanaagsan u Noolaanshaha iyo U Gaboobida**<br>• La shaqaynta kooxaha xaafadda ee Daryeelka Bulshada Dadka Waaweyn, iyo adeegyada loo xilsaaray, si kor loogu qaado Hagaha Madaxa-bannaan ee Daryeelka Tayada leh ee Loogu Talagalay Dadka Qaba Autism-ka ee Guddiga Qaranka ee Hawlaha Autism-ka.<br>• Sii kaabista iskaashiga jira ee u dhexeeya Xarunta Autism-ka iyo Adeegga U-doodista ee loo xilsaaray si loo bixiyo tababarka isku-doodista ee loogu talagalay dadka waaweyn ee qaba Autism-ka. |

## Mawduuca 6: Shaqaalaha

**Dadka deegaanka ah ee qaba Autism-ka inay taageero ka helaan xirfadlayaal ka warqaba dhaqanka autism-ka, dhaawacyada noolaleed, wax-ka-bedelada macquulka ah, caafimaadka maskaxda iyo jirka.**

| Waxa aan ballan qaadayno inaan qabanno muddada 5-ta sano ah ee istaraatiijiyaddan (ballanqaadyada istaraatiijiyadda). Waxaan: | Ficillada 12-ka bilood ee ugu horreeya (Sebtembar 2025 iyo wixii ka dambeeya) |
|---|---|
| **Si Wanaagsan U Bilow, Si Wanaagsan U Nolow & Si Wanaagsan U Gabow**<br>42. Xaqiijinta in dhammaan shaqaalaha Camden, oo ay ku jiraan hoggaamiyeyaasha, shaqaalaha aan takhasuska lahayn iyo xirfadlayaasha safka hore ay ka warqabaan:<br>• Dhaqamada xog-ogaalka u ah Autism-ka<br>• Dhaqamada xog-ogaalka u ah Autism-ka<br>• Wax-ka-bedelada macquulka ah<br>43. Xaqiijinta in ay jiraan meelo loogu talagalay inay shaqaalaha ku sahamiyaan sida hababkan loogu dabaqo shaqadooda, u wadaagaan dhaqamada wanaagsan, una hormariyaan waxbarasho joogto ah.<br>44. Xaqiijinta in ay jirto taageero wanaagsan oo loogu talagalay shaqaalaha kala duwan ee neerfaha, iyo iskaashi la samaynta ururada maxalliga ah si loo dhiirrigeliyo in taageeradan lagu dabaqo adeegyadooda. | **Da'a Kasta**<br>• Shaacinta iyo la socoshada qaadashada tababarka ee golaha oo dhan – 60% shaqaalaha golaha waa inay qaataan tababarka Oliver McGowan.<br>• Qabashada dhacdooyinka/munaasabadaha ku-dhaqanka milicsiga ah si shaqaalaha dhaqamada dhabta ah ugu lifaaqaan tababarka autism-ka ama si qoto dheer ugu dhexgalaan qodobbada lagu aqoonsaday lifaaqa istaraatiijiyadda, iyo in la horumariyo Horyaallada Autism-ka, wacyigelinta dhaqan joogto ah oo xog-ogaal u ah Autism-ka.<br>• Fursado u abuurista shaqaalaha kala duwan ee neerfaha si ay nooga caawiyaan horumarinta iyo fududeynta dhacdooyinka siminaarada iyo waxbarashada ee ku salaysan mowduucyada iyo shuruudaha ku jira lifaaqa istaraatiijiyadda.<br><br>**Si Wanaagsan u Bilaabidda**<br>• Dib u eegis ku samaynta barnaamijka waxbarashada autism-ka ee carruurteena marka loo barbar dhigo qaar ka mid ah tababarradii ugu dambeeyay ee qaybta.<br>• Shabakad horyaalada Autism-ka ah ka samaynta adeegyada carruurta si kor loogu qaado dhaqanka ku salaysan autism-ka looguna lifaaqo dhaqamada wanaagsan.<br><br>**Si Wanaagsan u Bilaabidda**<br>• Xaqiijinta in shaqaalaha Daryeelka Bulshada ee Dadka Waaweyn iyo shaqaalaha bixiyeyaasha diiwaangashan ee Guddiga Tayada Daryeelka (CQC) ay dhammaystireen tababarka Oliver McGowan ee ku saabsan autism-ka.<br>• Horumarinta wacyigelinta autism-ka ee shaqaalaha guryaha iyo in autism-ka lagu daro tababarka shaqo-gelinta ee shaqaalaha guryaha.<br>• Sii kaabista goobaha tababar iyo milicsi ee hadda jira ee loogu talagalay shaqaalaha Daryeelka Bulshada ee Dadka Waaweyn iyo bixiyeyaasha loo xilsaaray si loo horumariyo Horyaalka Autism-ka, korna loogu qaado dhaqanka joogtada ah ee ku salaysan autism-ka. |

## Mawduuca 7: Gelitaanka, ka mid noqoshada iyo sinnaanta aqoonsiyada kala duwan

**Dhammaan dadka deegaanka ah ee qaba Autism-ka inay u dabaaldegi karaan aqoonsiyadooda kala duwan, ayna si yar ula kulmi karaan caqabado xagga helitaanka taageerada ah.**

| Waxa aan ballan qaadayno inaan qabanno muddada 5-ta sano ah ee istaraatiijiyaddan (ballanqaadyada istaraatiijiyadda). Waxaan: | Ficillada 12-ka bilood ee ugu horreeya (Sebtembar 2025 iyo wixii ka dambeeya) |
| --- | --- |
| **Si Wanaagsan U Bilow, Si Wanaagsan U Nolow & Si Wanaagsan U Gabow**<br>45. Horumarinta xogteena iyo diiwaanadeena si aan si fiican ugu fahanno haddii dadka deegaanka ah ee qaba autism-ka ee ka kala yimid dhammaan asallada la daboolayo baahiyahooda iyo in laga shaqeeyo sidii wax looga bedeli lahaa adeegyada si arrintaas waafaqsan.<br>46. Golaha iyo hawlgalayaasheena oo dhan, waxaan wax ka qaban doonnaa sinnaan la'aanta ka jirta qaab-dhismeedka, takoorida naafanimada iyo takoorka ay la kulmaan dadka autism-ka qaba, qoysaskooda, asxaabtooda, daryeelayaashooda, iyo shabakadaha. | **Da'a Kasta**<br>• Xaqiijinta marka istaraatiijiyado kale, qorshayaal, hindisooyin iyo tijaabooyin iyo waxbarasho la sameeyo in la wadaago fariimaha muhiimka ah ee wax-soo-saarka autism-ka, isla markaana lagu lifaaqo codadka dadka khibradda u leh hadba meeshii ay suurtagal tahay.<br>• La shaqaynta Hay'adda Cilmi-baarista iyo Barashada Aqoonsiga Jinsiga (GIRES) iyo mashaariicda kale iyo hindisooyinka cilmi baariseed si loo horumariyo dhaqankeena la xiriira galmada, aqoonsiga jinsiga iyo nolosha dhow maadaama ay la xiriiraan dadka qaba autism-ka.<br><br>**Si Wanaagsan u Noolaanshaha iyo U Gaboobida**<br>• La shaqaynta Supporting Autistic Adults' Intimate Lives (SAAIL) iyo iyo mashaariicda kale iyo hindisooyinka cilmi baariseed si loo horumariyo dhaqankeena la xiriira galmada, aqoonsiga jinsiga iyo nolosha dhow maadaama ay la xiriiraan dadka qaba autism-ka.<br>• Taageerida adeegyada mutadawacnimada ah iyo kuwa bulshada ay hoggaamiso ee la xiriira autism-ka/cilladaha neerfaha/Naafanimada si loo abuuro goobo ammaan ah oo kala duwan oo ay hoggaamiyaan dadka isku aasaaga ah, oo ay ku jiraan goobaha ay hoggaamiyaan LGBTQ+ iyo Sinnaanta Jinsiga ee loogu talagalay dadka waaweyn ee qaba autism-ka. |



# Istaraatiijiyadda Ootisimka Da'a Kasta ee Camden

## Qorshaha Hirgelinta

Adeegyada hal-abuurka 5739.1

Camden